



## Somalia Non-State Actors (SONSA)

Telephone: 0612008723. E-mail: info@sonsaplatform.org website: www.sonsaplatform.org

### War- Saxaafadeed

21 December 2019: Dallada Bulshadda Rayidka ee SONSA oo horay loo oran jiray SOSSENSA kuna mideysanyihiin Ururada Bulshada Rayidka, Ganacsatada iyo Xirfadleyda, waxa ay soo dhawaynaysaa isla markaasna ay tageerayan war-saxaafadeedka wadajirka ah oo ay soo saaraan saaxiibada caalamka ee Soomaaliya (beesha caalamka), taas oo lagu sheegay muhiimada ay leedahay in 2020/21 Dalka ka dhacdo Doorasho qof iyo cod ah oo xor iyo xalaal ah.

Dalladu oo horey u soo saartay baaqyo la mid ah looga dalbanaayo Hogaanka Dowlada Federaalka, baarlamanka iyo Maamul Gobaleedyada in si xilksanimo kujirto loogu diyaar garoowo doorashooyinka 2020/21, lana qaado talaabooyinka iyo howlaha suurtagalinaya in doorashada ay xiligeeda ku qabsoomto, iyada oo laga dhabeynaayo in doorashadaas ay noqoto mid ay kawada qayb qaataan dhammaan qaybaha kala duwan ee Bulshada Soomaaliyeed.

Dalladu waxa ay sidoo kale ku adkaynaysaa hogaanka dalka iyo dhammaan inta danaynaysa hannaaka doorashooyinka 2020/21 ay kawada shaqeeyan hirgelinta doorasho cod iyo qof ah kuna dhisan xor iyo xalaal. Ururada Bulshada Rayidka waxa ay balan qaadayaan in ay kaalintooda ka qaadan doonan wax ka qabashada howlaha suurto gelin kara doorashooyinka 2020/21.

